



Michigan Department of State (Waaxda Gobolka ee Michigan)

Macluumaadka khaldan ee doorashada

Falka lagu faafinayo macluumaadka khaldan ee ku saabsan hanaanka doorashada, xuquuqda codbixiyayaasha, ama xitaa arrin ku saabsan warqadda cod bixinta ayaa khatar weyn ku ah amniga doorashada. Dedaaladaasi - ha ahaadaan kuwo shisheeye, kuwo gudaha ah, kuwo xisbi, ama kuwo anshax xumo uun ah - waxa loogu talogalay in lagu abuuro kalsooni daro hanaanka doorashadeena waxaanay dhaawac ku yihiin dimuqraadiyad caafimaad qabta.

Ka hortagga macluumaadka khaldan

Ka hortagga macluumaadka khaldan ee waxyeellada leh iyadoo la og yahay runta ayaan muhiim u ahayn oo kaliya xaqijintaa in doorashadeenu ahaato mid sugar oo sax ah oo ka tarjumaysa rabitaanka shacabka, balse sidoo kale sii noolaynaysa geeddi-socodkeena dimoqraadiyadeed.

Tirada badan ee macluumaadka la heli karo awgeed, waxaa aad hadda muhiim u ah in la karo saari karo macluumaadka aad helayso iyo kala shaandhaynta fariimaha badan ee tartamaya ee ka imanaya illaha kala duwan.

Haddii aanad hubin run ahaanshaha war ama sheegasho, waxaad boggagan internetka ka heli kartaa, macluumaad dhedhexaad ah oo la aamini karo:

- Michigan.gov/SOSFactCheck - Waxay bixisaa macluumaad sax ah oo ku saabsan doorashooyinka Michigan
- Snopes.com - Waxay baartaa oo beenisaa macluumaadka khaldan, aragtiyaha shirqoolka ah, been abuurka iyo waxyaboo kale oo badan
- FactCheck.org – Waxay xaqijisaa sxsanaanta dhabta ah ee khudbadda siyaasadda, xayeyisiyada, doodaha, wareysiyada, iyo war-saxaafadeedyada
- [PolitiFact](https://PolitiFact.com) - Waxay xaqijisaa sxsanaanta hadalada siyaasiyiinta

Ka qeybqaado!

Sida saraakiisha doorashadu ay waajib ugu tahay in ay oggaadaan macluumaadka khaldan ee doorashada oo ay si degdeg ah u bixiyaan macluumaadka saxda ah ee ku saleysan sharciga, cod-bixiyayaashu waxa ay mas'uulyadi ka saaran tahay in ay si firfircoo u raadiyaan ilo xogeed lagu kalsoonaan karo oo ay dhiirrigeliyaan wada hadal waxtar leh oo daacad ah.

Haddii aad aragto macluumaad marin-habaabin ah ama aan sax ahayn oo ku saabsan codbixinta ama doorashooyinka Michigan, fadlan soo sheeg - oo ku dar sawir haddii ay suurtagal tahay - una dir Misinformation@Michigan.gov.



Michigan Department of State (Waaxda Gobolka ee Michigan)

Sida la isku diiwaangeliyo si aad u coddeyso

Waxaa jira dhowr siyaabood oo la isku diiwaangelinayo si looga coddeeyo gudaha Michigan, oo ay ku jirto Maalinta Doorashada, laakiin waxaa fiican in la isku diiwaangeliyo sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah.

Ma u qalantaa?

Si aad xaq ugu yeelato inaad iska diiwaangeliso inaad ka coddeyso Michigan, waa inaad ahaataa qof degan Michigan ee magaaladaada ama deegaankaaga ugu yaraan 30 maalmood ka hor Maalinta Doorashada, muwaadin Mareykan ah, oo aan hadda ku jirin jeel ama xabsi, waana inaad jirtaa ugu yaraan 18 sanno kahor Maalinta Doorashada.

Ikhtiyaarada is diiwaangelinta

Waxaad buuxin kartaa arjiga is diiwaangelinta si aad u coddeyso ama aad u cusbooneysiiso diiwaangelinta codbixiyaha:

- **Onlayn ahaan – Booqo Michigan.gov/vote oo guji Register (Is diiwaangeli) si aad onlayn ugu coddeyso.**
- **Boosta ahaan -** Ka soo dejiso foomka diiwaangelinta cod-bixiyaha ee boostada Michigan.gov/VoterRegForm ama codso in foom laguugu soo diro boostada.
- **Laanta xafiiska Xoghayaha Gobolka-** Haddii aad u booqato laanta xafiiska Xoghayaha Gobolka si aad u qaadato shatiga darawalnimada ama macaamilka Aqoonsiga gobolka, si toos ah ayaa laguugu diiwaangelin doonaa inaad coddeyso ilaa aad dooratid in aanad sidaas sameyn. Haddii aad halkaas u joogto nooc kale oo macaamil ah, waxa kale oo aad gudbin kartaa foomka diiwaangelinta cod-bixiyayaasha.
- **Xafiiska karraaniga degmadaada, magaaladaada ama deegaankaaga -** Haddii aad doorato inaad iska diiwaangeliso karraaniga deegaankaaga si aad u coddeyso, waxaa lagaa codsan doonaa inaad keento aqoonsi sawir leh. Waxaad sidoo kale iska diiwaangelin kartaa inaad ka coddeyso xafiiska gargaarka dadweynaha ee gobolka sida Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha.

Taariikhaha kama dambeysta ah

Taariikhda kama dambeysta ah ee diiwaangelinta cod-bixinta iyo inaad awood u yeelan karto inaad ka coddeyso doorashada soo socota waa 15 maalmood ka hor doorashada haddii aad isku diiwaangelinayo qaab kasta oo aan ahayn fool-ka-fool karraaniga magaaladaada ama degmadaada.

Waxaad iska diiwaangelin kartaa si aad u coddeyso maalinta doorashada ilaa 8 p.m. xafiiska karraaniga ee magaaladaada ama degaankaaga adigoo wata caddeynta degenaanshaha kadibna codee intaad halkaas joogto.

Si aad u heshid macluumaadka codbixinta shakhsiyeed, booqo Michigan.gov/Vote



Michigan Department of State (Waaxda Gobolka ee Michigan)

Sida loo codeeyo adigoo maqan

Uma baahnid cudurdaar ama sabab - dhamaan cod-bixiyaasha ka diiwaangashan Michigan waxay hadda way ku coddeyn karaan iyagoo adeegsanaya warqada cod-bixinta maqnaanshaha.

Waxaa jira dhowr siyaabood oo lagu cadsado warqada cod-bixinta maqnaanshaha:

- Booqo Michigan.gov/Vote oo buuxi foomka onlaynka ah.
- Soo dejiso arjiga oo ku soo celi boostada ama si caadi ahaan karraaniga magaaladaada ama deegaankaaga.
- Wac karraaniga magaaladaada ama deegaankaaga oo ka codso in arji daabacan laguugu soo diro boostada.
- Si fool-ka-fool ahaan ah u booqo xafiiska karraaniga magaaladaada ama deegaankaaga.

Codsiyada onlaynka iyo boostada ee warqada cod-bixinta maqnaanshaha waa in uu helo karraaniga magaaladaada ama degmadaadu ugu dambayn 5 p.m. Jimcaha ka horeeya doorashada.

Haddii aad hore uga diiwaangashanayd ciwaankaaga hadda, waxaad si fool-ka-fool ah uga codsan kartaa warqada cod-bixinta maqnaanshaha xafiiska karraanigaaga wakhtiga aad doontid ilaa 4 p.m. ee maalinta ka horeysa doorashada.

Haddii aad qorsheynayso inaad ku coddeyo maqnaansho, u codso warqada cod-bixinta maqnaanshaha sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah. Codsiyada waxaa la soo gudbin karaa ilaa 75 maalmood ka hor doorashada.

Gudbinta warqadda cod-bixinta maqnaanshaha:

- Calaamadi warqada cod-bixinta oo hubi inaad saxeexo ku oo xidho baqshada soo celinta.
- Warqadaada cod-bixinta maqnaanshaha ee la buuxiyay waa inuu helo karraaniga magaaladaada ama deegaankaagi 8 p.m. ee Maalinta Doorashada.
- Wuxaad ku soo diri kartaa boostada ama gacanta ugu gudbin kartaa warqada cod-bixinta xafiiska karraanigaaga ama sanduuqa lagu rido.
- Haddii aad ku soo celinayso warqada cod-bixinta laba toddobaad gudahood Maalinta Doorashada, gacanta ugu soo →gudbi warqadaada cod-bixinta xafiiska karraanigaaga ama sanduuqa lagu rido si aad uga foggaato dib u dhac ku yimaada boostada.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan cod-bixinta maqnaanshaha,
booqo Michigan.gov/Vote**



Michigan Department of State (Waaxda Gobolka ee Michigan)

Is diiwaangelinta Maalinta Doorashada si aad u coddeyso

Sharciga Michigan wuxuu ogol yahay is diiwaangelinta cod-bixiyayaasha ee isla maalintaas. Waxaad iska diiwaangelin kartaa inaad si fool-ka-fool ah u coddeyso oo aad ka coddeyso wakhtiga aad doontid ilaa 8 p.m. Maalinta Doorashada xafiiska karraaniga magaaladaada ama deegaankaaga.

Waxaad u baahan doontaa inaad keento caddeynta u-qalmitaankaaga iyo degenaanshaha:

Caddeynta u-qalmitaanka:

Si aad xaq ugu yeelato inaad is diiwaangeliso si aad u coddeyso waa inaad:

- Ahaataa qof degan Michigan (wakhtiga aad is diiwaangelinayso) waana inaad tahay qof degan magaaladaada ama deegaankaaga ugu yaraan 30 maalmood (marka aad coddeyso)
- Ahaataa Muwaadin Mareykan ah
- Tahay ugu yaraan 18 sanno jir (marka aad coddeynayso)
- Aanad hadda ku jirin xukun xabsi ama jeel ah

Caddeynta degenaanshaha:

Waa inaad tustaa caddeynta meesha aad ku nooshahay. Dukumeentiyadu waa inay lahaadaan magacaaga iyo cinwaankaaga hadda. Waxaad tusi kartaa nuql dhijitaal ah oo dokumentiyada ah. Dukumiintiyada -la aqbali karo waxa ka mid ah

- Shatiga daraawalnimada Michigan ama kaarka Aqoonsiga gobolka
- Biilka tamarta hadda
- Bayaanka bangiga
- Jeegaga mushaharka ama jeega dawladda
- Dukumenti kale oo ka soo baxay dawladda



Michigan Department of State (Waaxda Gobolka ee Michigan)

U codeynta si fool-ka-fool ah

Haddii aad diwaangashan tahay, waxaad goor hore kaga coddeyn kartaa warqada cod-bixinta maqnaanshaha xafiiska karraaniga magaaladaada ama deegaankaaga. Si kastaba ha ahaatee, haddii ay tahay Maalinta Doorashada, oo aanad hore u haysan warqada cod-bixinta, waxaad ka coddeyn kartaa oo keliya goobta cod-bixinta ee degaankaaga.

Cod-bixintu waxay furan tahay 7 a.m. ilaa 8 p.m. wakhtiga maxaliga ah waxaanad xaq u leedahay inaad coddeyo haddii aad safka ku jirto 8 p.m. fiidnimo

Helidda goobtaada cod-bixinta

Waxaad si sahan u heli kartaa goobtaada cod-bixinta ama macluumaadka karraaniga magaaladaada ama deegaankaaga adigoo booqanaya [Michigan.gov/Vote](#).

Waxa aad filan karto:

Markaad timaaddo goobtaada cod-bixinta, waxaa lagu weydiin doonaa inaad tusto nooc ka mid ah aqoonsiga sawirka leh. Noocyada aqoonsiga ee la aqbalayo waxaa ka mid ah:

- Shatiga darawalnimada ama aqoonsiga gobolka ee laga bixiyay Michigan ama gobol kale
- Aqoonsi sawir leh oo ay dawlada dhexe, gobolka ama militarigu bixiyay
- Baasaborka Mareykanka
- Aqoonsiga ardayga ee dugsi sare ama machad la aqoonsan yahay oo tacliinta sare bixiya oo leh sawir
- Kaarka aqoonsiga qabiilka oo sawir leh

Haddii aanad haysan Aqoonsi sawir leh, wali waad coddeyn kartaa. Shaqaalaha cod-bixinta ayaa kaa codsan doona inaad saxeexdo foom kahor inta aanad coddeyn kaas oo sharaxaya in aanad haysan aqoonsi.

Kadib waxa aad saxeexi doontaa liiska cod-bixiyayaashaa ee shaqeynay awaxaana lagugu wareejin doonaa warqad cod-bixineed iyo galba qarinta si aad u ilaalso sirta codkaaga.

Kadib markaad gasho qolka si aad u calaamadiso warqadaada, waxaad ku soo celin doontaa warqada cod-bixinta galba qarinta.

Marka aad geliso warqadaada cod-bixinta cod-tiriyyaha, waxaad si rasmi ah u dhiibatay codkaaga.

Hubi inaad qaadato warqada tilmaanta "Waan codeeyey" haddii mid la heli karo.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan cod-bixinta fool-ka-foolka
ah, booqo Michigan.gov/Vote**